HERITAGE INSTITUTE

7 Faallo

Diseembar 2024

# 18 Bilood Waa Lagu Toosinkaraa Tubta Siyaasadda Soomaaliya

**Xuquuqda daabacaaddan © 2024 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.**

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda.

**© Heritage Institute for Policy Studies 2024.**

## Waa in si Geesinimo leh loogu Dhiiradaa Ka-gudbidda Qaybsanaanta, Sidoo kalena la Soo-nooleeyaa Kalsoonida lagu Qabi karo Nidaamka

### Hordhac: Qaran Isgoys Taagan

Tiiyoo ay muddadii loo qoondeeyay doorashooyinka baarlamaanka iyo tan madaxweynaha ka hartay 18 bilood oo keliya, taas oo ku began May 2026, ayay Soomaaliya waxa ay maraysaa isgoys halis ah. Nidaamkii siyaasadeed ee lagu soo dhisay Heshiiskii Carta ee 2000, oo lagu sii turxaanbixiyay Shirkii Mbagathi ee 2004, ayaa fure u ahaa in ay Soomaaliya ka soo kabato xaaladdii dawlad-la'aanta iyo dagaalladii sokeeye ee tobanka sano soo jiitamayay. Heshiisyadaasi waxa ay aas'aas u noqdeen Jamhuuriyaddii Saddexaad ee Soomaaliya, iyaga oo diiradda saarayay u dhammaanshaha maamulka, nidaamka faderaalka iyo dhisidda dowlad heshiis lagu yahay. Si kastaba ha ahaatee, is maandhaafka sii xoogaysanaya ee u dhexeeya Dowladda Faderaalka Soomaaliya iyo Dowlad Goboleedyada, oo ay weheliyaan go'aanno dowladeed oo dhinac la keliyoobay iyo kalsoonidii shacabka oo shiiqday, ayaa hadda meesha ka sii saaraya guulahaas dhibka badan loo maray xaqiijintooda.

### Kalsoonida la burburiyey: Khasaaraha Musuqmaasuqa

Soomaaliya waxa hareeyay musuqmaasuq ba'an oo wiiqay nidaamka dowladnimada, kaas oo si ballaaran ugu dhex faafay dowladda faderaalka iyo dowlad goboleedyadaba. Marka loo halbeegga 'Corruption Perceptions Index' ee ay diyaariso hay'adda Transparency International, Soomaaliya waxa ay si aan kala go' lahayn kaalinta ugu hoosaysa dunida oo dhan ka gashaa heerarka musuqmaasuqa. Soomaaliyana waxay tilmaan u noqotay dawladnimo/maamul la aafeysan falfalxumo, sida ku takri-fal miisaaniayaddii iyo hantidii guud iyo siyaasad ku dhisan isku daneysi. Dhaqanxumooyinkaas ayaa sumcaddii ka dilay hay'adihii dowladda, islamarkaana curyaamiyay bixinta adeegyadii aasaasiga ahaa, waxaanay sii kordhisay rajoxumada dadweynuhu ka qabaan dib-u-hagaajin ay dawladi hageyso.

Maamul-daadejinta dowladdanimada Soomaaliya, oo ku sifeysan isku murugsanaan awoodeed oo u dhexeysa dawladda faderaalka iyo dowlad goboleedyada, ayaa uga sii daray musuqmaasuqa, maadaama uu liito habkii islaxisaabtanku, nidaamka dhaqangelinta sharciguna nugulyahay. Marka loo eego halbeegga 'Worldwide Governance Indicators' oo uu Bangiga Adduunku diyaariyo, liidnaanta waxqabadka dalka, marka la eego waxtarka dawladda iyo xakamaynta musuqmaasuqa, ayaa muujinaya nuglaanta hay'adaha dowladda.

Haddii aanan si degdeg ah dib-u-habayn qotodheer loo samayn, Soomaaliya waxa ay qarka u saaran tahay in xasiloonidarrada siyaasadeed faraha kasii baxdo. Eexda baahsan ee xargo goosatay, ku-takri-falka awooda, iyo dabacsanaanta is-la-xisaabtanka ayaa wiiqay kalsoonidii dadweynaha, taasoo sii curyaamisey heshiiska bulsho (oo ah xariga isku haya muwaadinka iyo dawladnimada) oo markii horeba nuglaa. Horumar la'aanta dadaallada la dagaallanka musuqmaasuqa ayaa sii kordhinaya walaaca ay qabaan deeqbixiyeyaasha caalamiga ah, oo lafdhabar u ah sookabashada Soomaaliya, taasoo halis ku ah gargaarka dibadda ee lagama maarmaanka ah, iyo weliba iyadoo sidoo kale sii kordhinaysa nuglaantana ha'yadaha dalka.

## Qalalaasaha Siyaasadda oo kasii Daraya

Go'aamada ay la gaarka tahay Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa sabab u ah in qalalaasahii siyaasadeed uu sii xoogaysato. Horraantii 2024, ayay DFS waxkabeddel ku samaysay afar kamid ah 15ka cutub ee Dastuurka Kumeelgaarka ah, iyada oo aan ka samayn wadatashi iyo talo-gelin ku filan. Wax ka beddelkaas ayaa sababay in Puntland, oo ah dowlad goboleedka ugu da'da weyn xubnaha faderaalka Soomaaliya, ay joojiso wadashaqaynta ay la lahayd DFS. Inkasta oo aan si guud la isugu diiddanayn waxkabeddelka dastuurka, u dhammaan la'aanta waxkabeddelka ayaa wiiqday kalsoonidii lagu qabay dastuurka oo ah xuddunta isku haysa nidaamka faderaalka Soomaaliya.

Keli maroorsigaas awoodda ayaa muujinaysa sida loo waxtar tiray baarlamaanka faderaalka Soomaaliya. Baarlamaanka oo ay shaqaadiisu tahay korjoogtayn, ayaa lagu eedeeyay xadgudubyo soo noqnoqday oo ka dhan ah habraacyada sharci-dejinta, iyada oo si aan daahfurnayn loo meelmariyay go'aanno masiiri ah oo aan loo dhammayn. Inkasta oo eedaymahan aan la caddayn, dhaawaca ay u gaysteen kalsoonida lagu qabo hannaanka baarlamaanka ayaa wiiqaysa kalsoonida dadweynaha iyo in talada loo dhammaado oo lafdhabar u ahayd aas'aasyada Jamhuuriyadda Saddexaad.

Buburka ku yimi kalsoonida hay'adaha maamulka Soomaaliya ayaa khatar suulinkarta ku ah nidaamka faderaalka, oo loo arkayey yeel (aalad) lagu xaqiijin karo iskaashiga iyo dibuheshiisiinta qaybaha kala duwan ee siyaasadda.

## Colaadda DFS & Jubbaland

Iska-horimaadka hubaysan ee ciidamada Jubbaland iyo kuwa DFS ku dhex maray Raaskambooni ayaa baraarujin cad u ah nugaylka nidaamka siyaasadeed ee Soomaaliya. Halkii ciidamadan loo midayn lahaa cadowga ay wadaagaan, ee al-Shabaab, ayaa DFS iyo Jubbaland awooddi ciidamada qaranka iyaga isu adeegsaday. Al-Shabaab, oo ah halis amni oo muddo dheer soo jirtey, ayay u badan tahay in ay ka faa'iidaysato fawdadaas. Taas oo iftiiminaysa halista kala qaybsanaanta siyaasadeed ee ka dhex jirta hoggaanka Soomaaliya.

Colaaddani waxa ay muujinaysaa fashil siyaasadeed oo qotadheer, Inta loollanka xeeladeysan ee awoodu uu qarinayo waxyaalihii mudnaanta u lahaa qaranka. Inkasta oo ay doorashooyinka qof iyo codka ah, u ololaynayso DFS, ay la jaanqaadayso rabitaanka muwaadiniinta Soomaaliya, hadana hiddisahan sumcaddiisa waxa wiiqay daahfurnaan la'aan ku gadaaman sidii loo sameeyay shuruucda doorashooyinka iyo hay'adihii maamulilahaa. Go'aankii Jubbaland ee ay gaarka ugu qabsatay doorashadeedii bishii Nofeember 2024 ayaa sidoo kale hareeyeen xadgudubyo, taas oo sii dhaawacday kalsoonidii dadweynuhu ku qabay guud ahaanba heerarka kala duwan dowlada.

Cawaaqibxumadii ka dhashay mushkiladdii Jubbaland ayaa kalifay niyadjab muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo inuu sii kordho walaaca daneeyayaasha caalamiga ah.

Deeqbixiyayaasha, oo kaba ugu yaraan boqolkiiba 70 miisaaniyadda dowladda faderaalka Soomaaliya, ayaa kasii daalaya isqabqabsiga siyaasadeed ee joogtada ah, horumar la'aanta iyo ku tagrifalka khayraadka dalka. Haddii aan si degdeg ah looga hawlgelin, Soomaaliya waxa ay halis ugu jirtaa in ay lumiso taageerada caalamiga ah oo lamahuraan u ah dadaallada sookabashadeeda.

### Hakashada dagaalkii lagu la jirey Al-Shabaab

Bishii May 2022, bilowga kalkiisii labaad (dhextaalka) Madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud waxa uu islamarkiiba olole dagaal oo culus ku qaaday al-Shabaab, isaga oo taageero shacab iyo mid siyaasadeed oo ballaaran ku helay. Haseyeeshee, weererkii rogaalcelis ee ba'naa ee Cawsweyne ka dhacay Ogoosto 2023 ayaa gebi ahaanba weeciyay Jihadii dagaalka. Al-Shabaab waxa uu khasaare weyn u gaysatay Ciidanka Qaranka Soomaaliya (SNA), wuxuuna ka qabsaday hub culus, taas oo hakad wayn gelisay ololahii dagaalka.

Wixii intaa ka danbeeyey, waxa lumay jihada dadaallada dagaalka, waxaanay DFS u muuqatay mid ku jaahwareertay gaarida dano siyaasadeed. Dhanka kale, waxaa lasii wadey dhimista ciidanka Hawlgalka Ku-meel-gaarka ah ee Midowga Afrika ee Soomaaliya (ATMIS), taas oo sii wiiqday cududda ciidamada amniga Soomaaliya. Inkasta oo ay DFS markii hore u ololeyneysey in gebi ahaanba la saaro ciidamada nabad ilaalinta dhammaadka 2024, tan iyo maalintaas waxaa ay aqbashay xaqiiqada horteeda taalla, isla markaana garwaaqsatay baahida in la sii wado taageerada ka imanaysa Qaaradda Afrika.

Hakashada ololaha dagaalku may dhiirrigalin oo keliya al-Shabaab, laakiin waxa ay sida oo kale iftiimisay baahida degdegga ah ee loo qabo midaynta istaraatiijiyadaha milliteri iyo siyaasadeed ee dalka, si loo soo nooleeyo dardartii dagaalka argagixisada.

### Fursad Isbedel ee sii Libreysa

18 bilood oo keliya baa ka haray muddo-xileedkii hoggaanka DFS, laakiin waxa uu weli haystaa fursad yar oo uu ku qaadi karo tallaabooyin geesinimo leh oo uu ku saxi karo  qaladaadka siyaasadeed, iyo kuwa amni. DFS waxaa looga fadhiyaa in ay qaaddo taallaabooyin degdeg ah oo ay ku soo noolaynayso kalsoonida dadweynaha iyo aamminaadda beesha caalamka.

### Talojeedin

### Si loo Abuuro Isfahan Siyaasadeed iyo Kalsooni Caalami ah

- Waa in la qabto wadahadallo heer qaran oo ay ku dhan yihiin hoggaamiyeyaasha dowlad goboleedyada, madaxweynayaashii hore, raysalwasaarayaashii, raysalwaare kuxigeennadii, guddoomiyeyaashii baarlamaanka, iyo haldoorka bulshada rayidka ah.
- Waa in dagaalka al-Shabaab dib loo bilaabaa iyadoo loo lagu wajahayo dedaallo heer-qaran iyo kuwo heer-gobo lah  oo midaysan.
- Waa in la isku raacaa habraacyada doorashada qof iyo codka ah, dibu-eegista shuruucda doorashada, guddida doorashooyinka iyo xilliyada doorashada.

- Waa in la sameeyo Xukuumad Midnimo Qaran, si ay u ilaaliso isbeddello siyaasadeed iyo kuwo amni oo loo dhan yahay.
- In la muujiyo midnimo iyo horusocod marka la xallinayo khilaafaadka siyaasadda, sidoo kalena daahfurni lagula dhaqmo deeqbixiyeyaasha, taana waxaa lagu hanan karaa taageerada beesha caalamka oo lasii wado iyo soo noolaynta kalsoonidooda.

### Si Dib Loogu Soo-nooleeyo Amniga

- Waa in kheyraadka dalka lagu jiheeyaa ololaha dagaal ee al-Shabaab ka dhanka ah, iyada oo la gufaynayo goldaloolooyinka hawlgallada, lana hubinayo islaxisaabtanka.
- Waa in miisaaniyad joogto ah loo helaa Hawlgalka Taageerada iyo Xasilinta Midowga Afrika ee Soomaaliya (AUSSOM) si loo dhowro taageerada caalamiga ah ee amniga Soomaaliya.

### Si Musuqmaasuqa loola Dagaallo, loona Xoojiyo Dowladnimada iyo Kalsoonida Dadweynaha

- Waa in wax laga qabto musuqmaasuqa hareeyay dhammaan heerarka dowladda, iyadoo siyaasiyiinta loo sheegayo in ay canbaareeyaan ku tagrifalka dhaqaalaha dalka iyo ku xadgudubka awoodaha dowladda, iyada oo isla markaa daaha laga qaadayo in baaritaanno la xiriira musuqmaasuqa la samaynayo, islamarkaana la xukumi doono ciddii ay ku caddaato faldanbiyeed musuqmaasuq.
- Waxa loo baahan yahay in la sameeyo aaliyaad xooggan oo lagula dagaallamayo musuqmaasuqa, kuwaas oo ay ku jiraan in si degdeg loo dhiso Guddida Madaxabannan ee La Dagaallanka Musuqmaasuqa, iyada oo la dhammaystirayo istaraatiijiyadahiisa, lana hirgalinayo nidaamyo daahfuran oo qaabilsan qoondaynta khayraadka iyo dabagalkooda.
- Waa in dibuhabayn lagu sameeyo hannaanka dowladda si loo xoojiyo daahfurnaanta sida in la diyaariyo warbixinno joogto ah oo ku saabsan hawlaha dowladda iyo miisaaniyadda dadkana lala wadaago, isla mara ahaantaana la xoojiyo islaxisaabtanka iyada oo la abaabulayo bulshada rayidka ah iyo hay'adaha kormeerka ee madaxabannaan si ay ula socdaan wadashaqaynta iyo iskaashiga ka dhexeeya DFS iyo dowlad goboleedyada.

### Gunaanad: Maxaa Soomaali Dan u ah?

Isgoyska ay Soomaaliya taagantahay ayaa waxaa ay ka dhaxli kartaa burbur iyo xasilooni darro dheeraad ah. Si kastaba ha ahaatee, DFS, oo ku mitidda midnimo, daahfurnaan iyo iskaashi, waxa ay soo noolayn kartaa kalsooni, waxaynu dalku u jihaysanayn kartaa xasilooni iyo mustaqbal baraare leh. Waxqabad dhab ah iyo jihadi saxda ahayd oo la cusbooneysiiyo, Soomaaliya waxay ka gudbi kartaa caqabadaha haysta, islamarkaana xaqiijin kartaa in doorashooyinka 2026, ay bar-bilow toosan u noqdaan maamul dimoqraaddi ah iyo dadaallada dowlad-dhiska. Xaaladdan oo lagu sii jiraa waxa ay saamayn ba'an ku yeelan doontaa dowlad-dhiska iyo dadaallada nabadaynta.

HERITAGE

INSTITUTE

The Heritage Institute for Policy Studies
http://www.heritageinstitute.org